	XEERKA iyo / ama NIDAAMKA	
OhioHealth	**CIWAANKA: Xeerka Caawinta Dhqaalaha ("FAP")**	**LAMBARKA: F-300.300**
	TAARIIQDA LA SAMEEYAY: 7/1/2016	**TAARIIQDA BILOWGA: 7/1/2016**
	LA HORMARIYAY / DIB LOO EEGAY: Hogaanka Wareega Daqliga	
	WAXAA DIB U EEGAY: Sr. VP iyo CFO	**TAARIIQDA DIB LOO EEGAY:** Maarso 2016
	WAXAA ANSIXIYAY: Gullaha OhioHealth	

BAAXADA:

Xeerka wuxuu saameynayaa dhammaan xubnaha isbitaalka OhioHealth iyo dhaqaatiirta ka shaqeyso dhaqamada, OhioHealth Xarumaha Daryeelka Degdega iyo Daryeelka Guriga OhioHealth (si wadajir ahaan "xarumaha OhioHealth").

BAYAANKA UJEEDADA:

Howlgalka OhioHealth waa kordhinta wasiirka daaweynta iyada oo la siinayo adeeg tayo sareeyo iyo qarash wax ku ool ah oo looga jawaabayo baahiyada bulshada. Balanqaadka OhioHealth waxaa ku jiro siinta helitaanka daryeelka caafimaadka ee dadka aan laga eegin kartidooda lagu bixinayo. Xeerkaan wuxuu aasaasaa tilmaamaha OhioHealth ee siinta caawinta dhaqaalaha bukaanada xaqa u leh adeegyada qeyb ahaan ama buuxo ee la dhimay.

XEERKA: BARNAAMIJYADA CAAWINTA DHAQAALAHA

OhioHealth waxay bixisaa adeegyo la dhimay ama bilaash ah bukaanada xaq u leh adeegyada muhiimka ah ee caafimaadka ama degdega. Barnaamijyada Caawinta Dhaqaalaha OhioHealth waxaa ku jira kuwa xigga:

A. Barnaamijka Hubinta Daryeelka Caafimaadka (HCAP). Barnaamijka HCAP waa Waaxda Ohio ee Shaqada iyo Adeegyada Qoyska' (ODJFS) habka buuxinta sharuudaha fedaraalka waxay siisaa lacag bixin dheeraad ah isbitaalada taas oo siiso qeybsi ku haboon ee adeegyada aan la magdhabin ee la siiyo saboolka ama aan caymisneyn.

B. Barnaamijka Samafalka OhioHealth. Barnaamijka Samafalka OhioHealth wuxuu caawin siiyaa dareelka degdega iyo caafimaadka kale ee muhiimka ah ee la siiyo bukaanada xaqa u leh ee laga yaabo ilaha lacag bixinta kale aan laga heli karin. Barnaamijka Samafalka OhioHealth wuxuu bixinayaa:

- boqolkiiba 100% oo dhimis lacag biixnta masuuliyada bukaanka ilaa bukaanada daqligooda uu yahay ama ka hooseeyo 200% ee Tilmaamaha Saboolnimada Faderaalka;
- boqolkiiba 80% oo dhimis lacag biixnta masuuliyada bukaanka ilaa bukaanada daqligooda uu yahay ama ka hooseeyo 300% ee Tilmaamaha Saboolnimada Faderaalka ama;
- boqolkiiba 65% oo dhimis lacag biixnta masuuliyada bukaanka ilaa bukaanada daqligooda uu yahay ama ka hooseeyo 400% ee Tilmaamaha Saboolnimada Faderaalka.

C. Barnaamijka Dhibaatada OhioHealth. Halka barnaamijyada kore ay quseyso, OhioHealth waxay

leedahay xaqa sidoo kale lagu tixgelinayo codsiga Dhibaatada oo ku saleysan dacwad-ku-dacwad ee bukaanada haddii kale muujiya in dhibaato dhaqaale ay tahay masiibo aan horay u jirin, ama aan caadi aheyn. Labadaba Barnaamijka Samafalka OhioHealth iyo Barnaamijka Dhibaatada waa barnaamijyo meesha ugu dambeysay, micnaheeda yahay haddii barnaamij kale ee gobolka ama faferaalka loo heli karo in la siiyo caawinta, ama haddii illo kale laga helo karo in lagu bixinayo daryeelka bukaanka ama u lacag celinta bukaanka qarashaadka la xiriiro daryeelka, barnaamijkaas ama illaha waa in ay la dhameeyo ka hor inta bukaanka uusan xaq u lahaan barnaamijyada OhioHealth.

NIDAAMKA:

1. **Sharuudaha Xaq u lahaanshaha ee Barnaamijyada Caawinta Dhaqaalaha:** OhioHealth waxay isticmaashaa tilmaamaha xigga ee lagu aasaasayo xaq u lahaanshaha Barnaamijyadooda Caawinta Dhaqaalaha. Xaq ulahaanshaha Barnaamijka Caawinta Dhaqaalaha waxay u baahantahay labadaba in adeega iyo bukaanka xaq u lahaanayo Barnaamijka Caawinta Dhaqaalaha.

   A. **ADEEGYADA XAQA LOO LEEYAHAY:** Barnaamijyada Caawinta Dhaqaaalaha OhioHealth waxay quseysaa kaliya adeegyada daryeelka caafimaadka muhiimka ah ama degdega ee uu bixiyo isbitaalka OhioHealth, dhaqaatiirta u shaqeeya dhaqanka OhioHealth, Xarunta Daryeelka Degdega OhioHealth, iyo Daryeelka Guriga OhioHealth, sida kor lagu qoray. Go'aaminta haddii daryeelka caafimaad ahaan muhiim u yahay waxay ku saleysantahay dhinaca heerarka guud ahaan la ogolaaday ee daawada bulshada ay u adeegaan OhioHealth.

   Adeegyada gooni ahaan loogu soo diray bixiyayaasha kale ee caafimaadka, xitaa haddii lagu bixiyo isbitaalka OhioHealth, laguma daboolin xeerkaan. Bixiyayaayasha gaarka ah ee isbitaalka ee bixiyo adeegyada isbitaalka, iyo tilmaamayo haddii adeegyada mid walba bixiyo ay ku daboolantahay xeerka, waxay ku lifaaqantahay xeerkaan sida Lifaaqa 1.

   B. **BARNAAMIJKA SAMAFALKA OHIOHEALTH:** Barnaamijka Samafalka OhioHealth waxaa laga heli karaa bukaanada OhioHealth ee aan haddii kale xaqa u laheyn barnaamijka caawinta dhaqaalaha ee uu bixiyay xisbi sadexaad iyo aanan laheyn illo kale oo lacag bixin ah ama lacag celintaqarashaadka la xiriiro daryeelkooda. Illaheena lacag bixinta waa in lagu dhameeyaa ka hor inta bukaanka uusan xaq ugu lahaan caawinta dhaqaalaha waxaa ku jiri kara laakin kama xadidnaan karaan caymiska caafimaadka, HCAP, barnaamijyo badan ee dowlada, caymiska kale sida baabuurta, milkiilaha guriga, ama caymiska masuuliyada, ama xisbiga sadexaad ee laga yaabo in ay masuul ka noqoto daryeelka bukaanka. Bukaanada waa in ay buuxiyaan Codsiga Caawinta Dhaqaalaha iyo buuxiyaan sharuudaha xaq u lahaanshaha ee ku saleysan daqliga:

      1. Bukaanada daqligooda ka hooseeyo 200% ee Tilmaamaha Daqliga Saboolnimada Faderaalka hadeer waxay xaq u lahaan karaan boqolkiiba 100% ee dhimista samafalka ee masuuliyada lacag bixinta bukaanka.
      2. Bukaanada daqligooda u dhaxeeyo boqolkiiba 201% iyo 300% ee Tilmaamaha Daqliga Saboolnimada Faderaalka hadeer waxay xaq u lahaan karaan boqolkiiba 80% ee dhimista samafalka ee masuuliyada lacag bixinta bukaanka.
      3. Bukaanada daqligooda u dhaxeeyo boqolkiiba 301% iyo 400% ee Tilmaamaha Daqliga Saboolnimada Faderaalka hadeer waxay xaq u lahaan karaan boqolkiiba 65% ee dhimista samafalka ee masuuliyada lacag bixinta bukaanka.

   Dhimistaan waxay quseysaa dhinaca Warqada shaqada Dhimista Samafalka (Lifaaqa 2). Sabab la xiriirto Tilmaamaha Daqliga Saboolnimada Fedaraalka Isbedalayo sannad walba, OhioHealth si joogta ah ayay u cusbooneysiisaa waraqadaan shaqo. Cabirka qoyska waxaa ku jira bukaanka, xaaska bukaanka (oo aan laga eegin haddii ay ku noolyihiin guriga), iyo dhammaan carruurta bukaanka, dabiici ahaan ama la koriyay, sida waafaqsan da'da sideed iyo toban jirka ee ku nool guriga. Haddii bukaanka uu ka hooseeyo da'da sideed iyo toban, "qoyska" waa in ay ku daraan bukaanka, waalidka dhabta ee bukaanka ama soo korsaday (oo aan laga eegin haddii ay ku

noolyihiin guriga), iyo dhammaan carruurta bukaanka, dabiici ahaan ama la koriyay, sida waafaqsan da'da sideed iyo toban jirka ee ku nool guriga. Haddii bukaanka uu yahay waalid yar oo weli dagan guriga waaladiinta, "qoyska" waa in ay ku daraan kaliya waaladiinta iyo wixii carruur waaladiinta ah, dhalay ama soo korsaday, kaas oo dagan guriga. Bukaanada oo aan kowdii xaq u laheyn sababtoo ah waxay leeyihiin illo kale oo lacag bixin ah, tirooyinka bukaanka uu masuulka ka yahay ee laga yaabo in uu xaqa u leeyahay Barnaamijka Samafalka OhioHealth kadib dhammaan illaha lacag bixinta la la dhammeeyay, quseeya xadeynada sharciga quseeya Medicaid iyo Gobolka kale iyo Faa'idooyinka Federaalka.

Intaa waxaa dheer, halka aysan jirin barnaamijyo kale ee caawin dhaqaale ee quseeya, oo ay ku jiraan Barnaamijka Samafalka OhioHealth, OhioHealth waxay leedahay xaqa lagu tixgelinayo codsiga Dhibaatada ee ku saleysan dacda-ku-dacwad ee bukaanada Guddiga Dhibaatada OhioHealth go'aansado in xaq ugu lahaadaan sida ku saleysan muujinta dhibaatada dhaqaale ee ah masiibo, aan horay loo arag, ama aan caadi aheyn.

C. **HCAP:** Barnaamijka Hubinta Daryeelka Caafimaad waxaa maamulo Waaxda Ohio ee Shaqada iyo Adeegyada Qoyska (ODJFS) iyo waxaa lagu maamulaa sharuudaha gobolka iyo federaalka. OhioHealth ayaa codsado sharuudaha xaq u lahaanshaha HCAP oo tilmaamihiiba ka bilow ODJFS iyo OhioHealth ma lahan iqtiyaarka lagu badelayo iyaga. Xeerkaan wuxuu dulmaraa sharuudahaan.

1. **Sharuudaha Dananaanshaha** Bukaanada waa in uu si iqtiyaar ah ugu noolyahay gobolka Ohio. Tani waxaa ku jira deganaanshaha kumeel gaarka ah sida shaqaalaha ardayda ama socdaalka iyo bukaanada si kumeel gaar ah ula dagan qaraabo dagan gobolka. Tani kuma jirto bukaanada dagan gobol kale iyo kaliya u safro ama u guurayo Ohio ama wixii lacag bixin ah wixii bukaano ah ee imaaday Ohio kaliya in ay helaan daryeelka caafimaadka.
2. **Sharuuda Baahida Dhaqaalaha** - Bukaanka waa in uu buuxiyaa tilmaamaha daqliga ee ah ama ka hooseysa boqolkiiba 100% ee Tilmaamaha Daqliga Saboolnimada Faderaalka hadeer waqtiga adeega ee cabirka qoyska bukaanka. Cabirka qoyska waxaa ku jira bukaanka, xaaska bukaanka (oo aan laga eegin haddii ay ku noolyihiin guriga), iyo dhammaan carruurta bukaanka, dabiici ahaan ama la koriyay, sida waafaqsan da'da sideed iyo toban jirka ee ku nool guriga. Haddii bukaanka uu ka hooseeyo da'da sideed iyo toban, "qoyska" waa in ay ku daraan bukaanka, waalidka dhabta ee bukaanka ama soo korsaday (oo aan laga eegin haddii ay ku noolyihiin guriga), iyo dhammaan carruurta bukaanka, dabiici ahaan ama la koriyay, sida waafaqsan da'da sideed iyo toban jirka ee ku nool guriga. Haddii bukaanka uu yahay waalid yar oo weli dagan guriga waaladiinta, "qoyska" waa in ay ku daraan kaliya waaladiinta iyo wixii carruur waaladiinta ah, dhalay ama soo korsaday, kaas oo dagan guriga. Bukaanka ma heli karo Medicaid ama barnaamijkii gobolka kale ee Medicaid.
3. **Sharuuda Adeegyada** - Adeegyada waa in caafimaad ahaan lagu daboolaa tilmaamaha ODJFS walba.
4. **Codsiga la Saxiixay** – Codsi la saxiixay ayaa looga baahanyahay xaq u lahaanshaha barnaamijka HCAP.

D. **BARNAAMIJYADA BULSHADA:** OhioHealth waxay aqoonsataa iyo la shaqeysaa tirooyinka barnaamijyada saboolnimada, sida barnaamijyada samafalka noqon kara ee warshada farmashiga. Barnaamij walba oo noocaas waxaa maamulo sharuudahooda gaarka ah ee xaq ulahaanshaha iyo xaq u lahaanshaha barnaamijya noocaas ah ma ka koobnaanayo xaq ulahaanshaha Barnaamijka Caawinta Dhaqaalaha OhioHealth. Si kastaba, OhioHealth sidoo kale waxay ka qeybqaadataa barnaamijka Xarunta caafimaadka Farmashiga bilaashka ah. Bukaanada ka qeybgalayo barnaamijka Xarunta caafimaadka Dhaqaatiirta bilaashka ah iyo qofka helo ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah ee xarunta OhioHealth sida qeyb ka ah barnaamijka Xarunta caafimaadka bilaashka ah, waxay xaq u leeyihiin in ay kaga helaan daryeelkaas si bilaash ah xarunta OhioHealth.

2. SIDA LOO CODSADO BARNAAMIJYADA CAAWINTA DHAQAALAHA:

A. Si loo weydiiyo Caawinta Dhaqaalaha: Bukaanada waxay codsan karaan Barnaamijyada Caawinta Dhaqaalaha waqti walba ka bilow diiwaanka hore ilaa akoonka bukaanka la xiro. Warbixinta ee sida loo codsado, iyo wixii su'aalo ah ee la xiriiro codsiga, bukaanka wuxuu soo wicii karaa Adeega Macaamiisha ee (614) 566–1505 ama 1-800-837-2455 ama bukaanka wuxuu la soo xiriiri karaa Adeega Macaamiisha dhinaca i-meel ahaan customercenter@ohiohealth.com ama booqo xafiiska diiwaanka ama cafiiska qasnajiga ee xarun waklba ee OhioHealth (ciwaanka daganaanta ee xarun walba ee OhioHealth waxaa lagu diyaariyay Lifaaqa 3 ee FAP-kaan) iyo weydii in aad la hadashid La taliyaha Dhaqaalaha. Dhammaan bukaanada oo dhan ee xarunta OhioHealth wuxuu weydiin karaan in aad ka hadashid La taliyaha Dhaqaalaha xili walba.

B. Si aad u heshid Foomka Codsiga Caawinta Dhaqaalaha: Foomamka codsiga waxaa la heli karaa inta lagu jiro diiwaangelinta ee dhammaan goobaha OhioHealth, iyo sidoo kale waxaa lagula daray dhammaan qoraalada biilka OhioHealth. Intaa waxaa dheer, codsiga caawinta dhaqaalaha waxaa laga heli karaa onleenka: https://ohiohealth.com/financial assistance/

C. Si aad u buuxisid Foomka Codsiga Caawinta Dhaqaalaha: Loo tixgeliyay in ay buuxdo:

1. Codsiga waa in si buuxdo loogu buuxiyaa sida waafaqsan tilmaamaha foomkaaga ku jiro;
2. Codsiga waa in ay saxiixaan bukaanka, masuulka bukaanka, ama dhaqaale ahaan qofka masuulka uga sida ay quseyso;

3. Codsiga waa in uu ku lifaaqnaadaa waraqaaha ku haboon ee daqliga, oo ay ku jiraan:

   a. Rasiidyada joornaatiga oo midkood daboolaya muddada taariiqda adeega ama taariiqda codsiga, ama labo iyo tobanka bilood ee taariiqda ama codsiga, wax walba oo bukaanka doorto. Haddii rasiidyada lacag bixinta aan la heli karin, warqad ka socoto badrooniga codsadaha (ee u horeyso tixraaca shirkada) ee cadeyneyso daqliga guud ee sadexda bilood ka hor taariiqda adeega (ama codsiga) laga yaabo in la ogolaado. Warqada shirkada waa in uu saxiixaa sarkaal shirkada ah iyo magaca xiriirka iyo waa in ay ku jirtaa sidoo kale lambarka taleefonka qofka lagala xiriirayo shirkada.

   b. Daqliga xaaska oo aan laga eegin haddii isaga/iyada ay ku noolyihiin guriga bukaanka.

   c. Qoraalada bangiga haddii loo isticmaalay joornaatiga ama diboosidka tooska ah ee Daqliga Amniga Bulshada, kaas oo xaalada, codsadaha ah in uu muujiyo haddii caymiska caafimaadka ama lacag bixinada kale laga jaro – iyo haddii ay sidaas tahay, intee.

   d. Waxay ku xirantahay xaaladaha, OhioHealth laga yaabo, ka bilow waqti ilaa waqti, ogolaado W2's ama soo noqodka canshuurta ee canshuurta hadeer e la buuxiyay sannadka sida cadeynta daqliga bukaanka.

   e. Waraaqaha taageerada carruurta iyo/ama lacag bixinta garoobta la helay, la siiyay, si kastaba, midaas, taageerada carruurta looma tixgeliyo daqli ilaa ay tahay bukaanka/canuga taageerada la siiyay.

   f. Waraaqaha magdhowga shaqo la'aanta, magdhowga shaqaalaha, tallooyinka, danaha, daqliga kirada, daqliga howlganka, daqliga maalgashiga, dhaxalka ama nooc kale ee daqliga ah ama magdhowga la helay inta lagu jiray muddada labo iyo tobanka (12) bilood ee hogaamineyso taariiqda adeega ama taariiqda codsiga.

4. Codsiga waxaa ku jira bayaanka u ogolaanaya OhioHealth in ay helaan warbixinta dhaqaalaha

ee ka imaaneyso illalaha kale sida wargelinta deynta bukaanka, baaritaanka hantida iyo/ama warbixinta ka imaaneyso hay'ada isku darka haddii loo baahanyahay;

5. Codsiga waa in lagu soo celiyaa ciwaanka ku yaala Lifaaqa 3.

6. Xaaladaha la ogolaan karo, xarunta wacitaanka wakiilada macmiilka OhioHealth waxaa loo ogolyahay in uu qaado Codsiyada Caawinta Dhaqaalaha oo dhinaca taleefonka.

D. Faa'idooyinka Codsiyada Caawinta Dhaqaalaha ee Bukaanada Aan Xaq u Laheyn Barnaamijyada Caawinta Dhaqaalaha: Buuxinta Codsiga Caawinta Dhaqaalaha waxay bxiin kartaa faa'idooyinka xitaa bukaanada aan xaqa u laheyn caawinta dhaqaalaha.

1. Medicaid ama Barnaamijyada Dowlada ee Kale: Xiliga helida Codsiga Caawinta Dhaqaalaha halka lagu tilmaamay in bukaanka laga yaabo in uu xaq u lahaado Medicaid, bukaanada xaqa u leh Medicaid waxaa loo gudbinayaa taqasus xaq u lahaanshaha Medicaid si uu uga caawiyo bukaanka codsashada Medicaid ama barnaamijka kale waafaqsan ee dowlada. Taqasuska xaq ulahaanshaha Medicaid waxay ka caawineysaa bukaanka/qoyska ilaa nidaamka codsiga, oo ay ku jiraan caawinta helida dhammaan waraaqaha oo dhan ee looga baahanyahay barnaamijka dowlada.
2. Qorshooyinka Qeyb dhigida lacagta: Dhammaan codsadayaasha waxay xaq uleeyihiin qorshaha lacag bixinta qeyb dhigida lacagta. Diyaarintaan waxay bixisaa danaha deymo bilaash ah oo ugu yaraan lacag bixinta billaha.
3. Dhimista aan caymisneyn ama Lacag bixinta Shaqsiga: Codsiyada aan caymisneyn ee aanan u qalmin HCAP, dhimida Samafalka OhioHealth ama dhimista dhibaatada, iyo, sidaas darteeda, aanan u qalmin sida bukaan xaq u leh sida waafaqsan xeerkaan, waxay xaq u leeyihiin Dhimista Aan Caymisneyn ee degdega ama adeegyada kale ee daawada sida bukaanka u helo. Dhimista aan Caymisneyn waa boqolkiiba 35% ka dhiman qarashyada degdega noocaas ah ama adeegyada caafimaad ahaan muhiim u ah.

E. Tixgelinada Kale ee Xaq ulahaanshaha ee Dhacdada Waraaqaha Daqliga ama Codsi Buuxo Lama soo Sari karo: Aqoonsiga in bukaanada qaar aysan u suurtogaleynin in ay soo saaraan qaar kamid ah ama dhammaan waraaqaha la codsaday ama warbixinta muhiimka ah oo lagu diyaarinayo iyo lagu gudbinayo codsi buuxo sida waafaqsan sharuudaha xeerkaan ama haddii kale laga yaabo in aysan u suurtogalin in la bixiyo codsiga gabi ahaanba, OhioHealth waxay u adeegtaa xaqa lagu go'aansanayo xaq ulahaanshaha bukaanka ee Barnaamijyada Caawinta Dhaqaalaha sida ku saleysan guud ahaan warbixinta la heli karo. Arimaha waafaqsan waxaa ku jira, laakin kama xadidna, xaaladaha xigga:

1. Bukaanka wuxuu ku dhintay gobol aan laga garaneynin;
2. Bukaanka uu guri la'aan yahay iyo /ama uu siiyay cinwaan hoy inta lagu jiray nidaamka diiwaangelinta, ama dirista loo soo celiyay sida guri la'aan;
3. Qoyska/saaxib wuxuu ku dhawaaqay warbixinta taageyreyso usuurtogal la'aanta bukaanka ee lagu bixinayo;
4. Bukaanka wuxuu sheegay in isaga ama iyada ay yihiin dhinane dambi. Dacwadahaan, bukaanka waa in uu codsada caawinta dhaqaalaha ka hor inta aan lagu magdhabin daboolida ilaa barnaamijka Dhibanayaasha Dambiga;
5. Bukaanka la xabsiyeeyay inta lagu jiray 3 ama 12 bilood ka hor taariiqda adeega;
6. Dacwadaha la ogolaan karo, codsiga hadalka/amarqaati furka bukaanka laga yaabo in loo arko in la ogolaan karo kadib 30 maalmood ee la xiriirto taxadarka dadaalada lagu helayo saxiixa bukaanka;

7. Bukaanka leh Ka baxsan Gobolka Medicaid iyo OhioHealth ma haysto lambarka bixiyaha gobolkaan;
8. Bukaanka wuxuu ahaa helaha Medicaid midkood ka hor taariiqda adeega ama kadib;
9. Dacwada masiibada ee la ansixiyay samafalka qeyb ahaan sabab la xiriirto haraayada haray;
10. Bukaanka wuxuu xaq u lahaa HCAP/Samafalka midkood ka hor taariiqda adeega ama kadib;
11. Daqliga hadeer ee bukaanka iyo tayooyinka cabirka qoyska ee bukaanka daryeelka samafalka sida waafaqsan xeerkaan iyo, sidaas darteed, laga yaabo in ay u go'aansato xaq ulahaansho ka hor taariiqaha adeega, bukaan jiifka iyo bukaan socodka; ama
12. Bukaanka waxaa lagu daboolay sida waafaqsan barnaamijka Qorsheynta Qoyska Medicaid.

F. Codsiga Dhibaatada: Bukaanka markuu buuxiyay kadib Codsiga Caawinta Dhaqaalaha iyo lagu go'aansaday in aan xaq ulaheyn Barnaamijyada kale ee Caawinta Dhaqaalaha, ama ma ku qancin sharuuda kale ee xaq ulahaanshaha lagu dajiyay Qeybta kore ee E, OhioHealth waxay leedahay xaqa lagu tixgelinayo codsiga Dhibaatada oo ku saleysan dacwad-ku-dacwad ee bukaanada ee Guddiga Dhibaatada OhioHealth ay go'aansato in xaq u leeyahay sida ku saleysan xaalad dhaqaale oo aan horay loo arag ama diin ama aaminaada dhaqanka ee aasaasto masiibo muuqata, xaalad aan horay loo arag ama aan caadi aheyn. Si aad u codsatid barnaamijka Dhibaatada, bukaanka waa in uu warqad u diraa oo sharaxeyso xaaladaha aan horay loo arag iyo codsanaya tixgelinta iyo wixii waraaqo taageerayo ee ku socoto: OhioHealth CBO, P.O. Box 7527, Dublin, Ohio 43016. Tixgelinta codsiga Dhibaatada waxay u baahantahay in bukaanka ku dhawaaqo in hantiyada oo dhan, oo ay ku jiraan maalgashyada ama hantida kale ee qiimo weyn, badeecada, raasumaalada, wixii deeqsimooyin ee la helay, iyo dhammaan illaha kale ee hantiyada ama daqliga.

3. GO'AAMINADA XAQ ULAHAANSHAHA: Go'aamada xaq ulahaanshaha Barnaamijka Caawinta Dhaqaalaha waxay wanaagsantahay muddooyinka xiga:

A. Adeegyada bukaan jiifka, go'aamada xaq ulahaanshaha iyo HCAP waxaa loo sameeyaa si gooni ah diiwangelin walba, ilaa bukaanka dib looga diiwaangeliyo 45 maalmood gudahood oo isla midka xaalada waafaqsan, taas oo xaalada go'aaminta xaq u lahaanshaha ay quseyneyso dib u diiwaangelinta noocaas ah.

B. Adeegyada bukaanka, go'aamada xaq ulahaanshaha ee HCAP waxay wanaagsanyihiin 90 maalmood.

C. Go'aamada xaq ulahaanshaha Barnaamijka Samafalka OhioHealth (bukaan jiifka iyo bukaan socodka) waxay wanaagsanyihiin 180 maalmood. Intaa waxaa dheer, go'aamada xaq ulahaanshaha laga yaabo in ay quseyso akoonada jiray ee la soo dhaafay ee aan la xiriirneyn daryeelka codsiga caawinta dhaqaalaha la gudbiyay. Haddii go'aamada xaq ulahaanshaha ay quseyso akoonada jiray ee la soo dhaafay ee bukaanka, wixii lacago ah ee bukaanka gaar ahaan u bixiyay ee akoonada jiray ee la soo dhaafay ee xad dhaafka lacagaha bukaanka gaar ahaan masuulka ka noqonayo iyada oo la isticmaalayo bqoolkiiba AGB ee lagu sheegay sadarka 5 ee hoose, waa in la siiyaa bukaanka.

D. Haddii, waqti walba, bukaanka loo tixgeliyay xaq ulahaanshaha caawinta dhaqaalaha oo qeybta daryeelka ku saleysan xiliga ka horeysa go'aaminta xaq ulahaanshaha iyo caawinta bukaanka uu u go'aansaday xaq u lahaansho waxay ka yartahay deeqsiga ugu badan ee caawinta lagu bixiyay sida waafaqsan xeerka, bukaanka waxaa la soo ogeysiinayaa in isaga/iyada laga yaabo in ay quseyso caawinta badan ee deeqda ah.

4. OGEYSIINTA CAAWINTA DHAQAALAHA: Saxiixyada waxaa la soo dhigaa isbitaal walba oo qolka degdeg ee OhioHealth iyo goobta diiwaanka bukaanada oo sheegayo u hogaansanaanta OhioHealth ee Barnaamijka Hubinta Daryeelka Cafimaadka Gobolka Ohio (HCAP). Intaa waxaa dheer saxiixa wata tixraaca Barnaamijka Samafalka hay'ada. Alaabaha warbixinta, oo ay ku jiraan koobiyada

xeerkaan, dulmarka luuqad qalalan ee xeerkaan ah, iyo codsiga waxaa laga heli karaa goobaha diiwaangelinta, Qolalka Gurmadka, iyo waxaa lagu heli karaa boosta ahaan iyo dalacaada. Bukaanada waxaa sidoo kale la siinayaa warqada koobiga ee dulmarka luuqada qalalan ee xeerkaan sida qeyb ka ah nidaamka qaadashada. Waraaqahaan waxaa sidoo kale laga heli karaa onleenka https://www.ohiohealth.com/financialassistance/, iyo waxaa laga heli karaa mid walba oo luuqadaha looga hadlo bulshada. Adeegyada turjumaada waxaa sidoo kale loo diyaarin karaa bukaanka/damiinka aan ku hadlin Ingiriis. Sidoo kale, qoraalada biilasha waxaa ku jira warbiixnta la xiriirto HCAP, Barnaamijka samafalka OhioHealth iyo codsiga caawinta dhaqaalaha.

5. **LACAGAHA GUUD AHAAN LA DIRAY:** Bukaanada lagu go'aansaday in ay xaq u leeyihiin Barnaamijka Caawinta Dhaqaalaha, OhioHealth maka noqoneyso masuul bukaanka oo in kabadan "lacagta guud ahaan la diray" (ama AGB) ee ka timid istbitaalka. Boqolkiiba AGB waxaa lagu xisaabiyay iyada oo la isticmaalayo qaabka "Gadaal-Fiiri", sida lagu qeexay sharciyada faderaalka. Isbitaal walba ee OhioHealth waxay xisaabisaa boqolkiiba AGB sida ku saleysan sheegashooyinka oo dhan ee ay ogolaadeen Medicare iyo caymiyaha gaarka ah ee caafimaadka in ka badan muddo 12 bilood, loo qeybiyay isbitaalka u qalma ee la xiriiro qarashaadka guud ee sheegashooyinkaas. Boqolkiiba AGB waxay ku kala duwantahay isbitaalka, laakin dhammaan isbitaalada OhioHealth waxay la mid tahay wax aan ka badneyd boqolkiiba 65% dhimista qarashaadka guud. Xisaabintaan waxaa la cusbooneysiiyaa sannadle. Xubnaha bulshada laga yaabo in ay wadato koobiga isbitaalka gaarka ah ee OhioHealth boqolkiiba AGB bilaash ka ah wacitaanka Xarunta Wacitaanka Macmiilka ee 614-566-1505 ama qoraal ahaan ku socdo OhioHealth CBO, PO Box 7527, Columbus, Ohio 43016.

6. **KU DIRISTA IYO ARUURINTA MASUULIYADAHA BUKAANKA:** OhioHealth waxay isticmaaleyn dadaalo daryeel leh ee lagu ilaalinayo illaheeda samafalka leh ee qarash diris ku haboon iyo dabagalka aruurinada adeegyada ay bixiyeen OhioHealth. OhioHealth waxay joogeysaa Biil sameyn gooni ah iyo Xeer Aruurinta iyo sharaxaad buuxdo ee nidaamkaan ah. Xubnaha bulshada laga yaabo in si diyaar ah ay u helaan koobi bilaash ah ee xeerkaan gooniga ah iyada oo la wacayo Xarunta Daryeelka Macmiisha ee (614) 566-1505.

JOOJINTA: SPP F-300-R bilaabaneyso Agoosto 19, 2003 waala joojiyay.